

السماحة عقيدة وسلوكاً

Dabacsanaanta caqido iyo dhaqaan ahaan

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(يُرِيدُ اللَّهُ بِكُمُ الْيُسْرَ وَلَا يُرِيدُ بِكُمُ الْعُسْرَ)

(Wuxuu idinla doonayaa Alle fudayd ee idin lama doonayo culays)

Waxaan qirayaan in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaan in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa oo xadiiskiisa sharafta leh ku yiri:

(بِعِثْتُ بِالْخَيْفَةِ السَّمْكَةِ)

(Waxaa layla soo diray diinta sahlan).

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Intaas kaddib:

Wuxuu la yimid nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - risaalo caalami ah oo ka dhigatay dabacsanaanta iyo fududeynta manhaj nololeed, wax

dhib kuma sugna diinta, wax rafaad ah ma laha kallifaadda, wax dhibaato ma jirto, wax culeys ma jiro, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{وَمَا جَعَلَ عَلَيْكُمْ فِي الدِّينِ مِنْ حَرَجٍ}

(**Mana yeelin diinta dhib**), wuxuu leeyahay nabigeena:

(إِنَّ الدِّينَ يُسْرٌ، وَلَنْ يُشَادَ الدِّينَ أَحَدٌ إِلَّا غَلَبَهُ، فَسَدَّدُوا، وَقَارَبُوا، وَأَبْشِرُوا، وَاسْتَعِنُوا بِالْغُدُوَّةِ وَالرُّوْحَةِ، وَشَنِيءٌ مِّنَ الذُّلْجَةِ)

(**Diinka wuu fudud yahay, qof iskuma adkeeyo haddii kale wuu ka adkaanayaa, toosiya dhexdhexeysta bishaareysta, kaalmeysta arootii iyo galabtii iyo qeyb ka mid ah dheelmashada**).

Dabacsanaanta shareecada Islaamka ma aha erey afka laga dhahayo ama astaan kor loo qaadayo, waa caqiido oo uu qofka muslinka ku nool yahay oo uu ka dhiganayo manhaj nololeed, sidoo kale waa mabda' ka mid ah mabaadi'i da oo Ilaahay amray addoomihiiisa inay iskula dhaqmaan, wuxuuna ka dhigay sababka raalli ahaanshihiisa iyo dambidhaafkiisa iyo naxariistiisa wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{وَلْيَعْفُوا وَلْيَصْفَحُوا أَلَا تُحِبُّونَ أَنْ يَغْفِرَ اللَّهُ لَكُمْ}

(**Hana iska cafiyaan hana saamaxaan, miyeydaan jeclayn inuu idiin dhaafio Alle**).

Waxa aan u ordayno waa inay noqoto dabacsanaanta dhaqan nololeed, maxaayeelay ugu yeeridda Islaamka ugu yeerayo dabacsanaanta waa ugu yeerid fal ahaan

loo dabaqo, wuxuu ugu yeeray Allaha xaqa ah subxaanahu addoomihiisa cafiska is masaamixidda meelo badan ka mid ah kitaabkiisa kariimka, wuxuu yiri:

﴿وَلَا تَسْتَوِي الْحَسَنَةُ وَلَا السَّيِّئَةُ اذْفَعْ بِالَّتِي هِيَ أَحْسَنُ فَإِذَا أَذْنَى بَيْنَكَ وَبَيْنَهُ عَدَاؤٌ كَأَنَّهُ وَلِيٌ حَمِيمٌ﴾

(*Mana sinna wanaag iyo xumaan, reeb oo (bixi) arrinta fiican markaas waxaa soobixi in midkii col idin dhaxyiil uu noqon sokeeye iyo saaxiib*)

Nabigana wuxuu samaaxada ku dabbaqay dadka, wuxuu ahaa midka ugu fiican xagga ku dayashada umaddiisa iyo dadka oo dhan, wuxuu leeyahay:

(إِنَّمَا أَنَا رَحْمَةٌ مُهْدَأةٌ)

(*Aniga waxaan ahay uun naxariis hadiyad ah*), waxay leedahay mu'miniinta hooyadooda sayida Caa'isha - Ilaahay raalli haka noqdee :-

(ما خُيِّرَ رسول الله (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) بَيْنَ أَمْرَيْنِ إِلَّا اخْتَارَ أَيْسَرَهُمَا مَا لَمْ يَكُنْ إِثْمًا ، فَإِنْ كَانَ إِثْمًا كَانَ أَبْعَدُ النَّاسِ عَنْهُ...)

(*Rasuulka Alle labo arrin lama doorgaliyo hadday dhacdana wuxuu dooran jirin kan ugu fudud hadduuna ahayn dambi, hadduu dambi yahayna wuxuu ahaa kan kaga fogaansho badan dadka...*).

Su'aasha ay habboon tahay qof kaste inuu si toos isu weyddiyo: annagu ma nahay kuwa caqiidadan ku dabaqo dhaqankeena? Miyaan ka dhignay manhaj aan kula dhaqmayno dadka oo dhan? samaaxadda waa

dhaqan qiime badan oo ay habboon tahay qofka muslinka inuu nolosha oo dhan uu ku dabbaqo, taasna waxaa ka mid ah:

*dabacsanaanta ka dhexeyso ninka iyo xaaskiisa: xiriirka guurka wuxuu ka mid yahay xiriirada dadka kan ugu sarreeya, waa aayad ka mid ah aayadaha Alle, Ilaahay (cazza wajalla) wuxuu caddeeyay xiriirkaas inuu ku dhisan yahay kalgacal iyo naxariis iyo dhaqan suuban wuxuu yiri Alle:

{وَمِنْ آيَاتِهِ أَنْ خَلَقَ لَكُمْ مِّنْ أَنفُسِكُمْ أَرْوَاجًا لِتَسْكُنُوا إِلَيْهَا وَجَعَلَ
بَيْنَكُمْ مَوَدَّةً وَرَحْمَةً}

(Waxaa ka mid ah calaamooyinkiisa inuu idiinka abuuray naftiina haween si aad isugu xasishaan, yeelayna dhexdiina isjacayl iyo naxariis), wuxuu yiri Alle subxaanahu:

{وَعَاشِرُوهُنَّ بِالْمَعْرُوفِ فَإِنْ كَرِهْتُمُوهُنَّ فَعَسَى أَنْ تَكْرَهُوْا شَيْئًا وَيَجْعَلَ
اللَّهُ فِيهِ خَيْرًا كَثِيرًا}

(Kulana noolaada si fiican, haddaad kahataan waxaa suurowda inaad kahataan wax uu yeelo Alle dhexdiisa khayr badan), wuxuu yiri Alle:

{وَلَهُنَّ مِثْلُ الَّذِي عَلَيْهِنَّ بِالْمَعْرُوفِ}

(Haweenkuna waxaay leeyihiiin wax la mid ah waxa korkooda ah si fiican), waxaa laga wadaa waxay ku

leeyihiiin dhaqanka wanaagsan iyo saaxiibtinnimada nimankooda sida iyaga waxa laga rabo oo kale, wuxuu leeyahay rasuulka:

(خَيْرُكُمْ خَيْرُكُمْ لِأَهْلِهِ ، وَأَنَا خَيْرُكُمْ لِأَهْلِي)

(Midkiina ugu khayr badan waa kiina ugu khayr badan reerkiisa, anigaa idinkaga khayr badan ehelkayga).

Nabiga in badan ayuu ku dardaarmay haweenka wuxuu leeyahay:

(لَا يَفْرُكُ مُؤْمِنٌ مُؤْمِنَةً ، إِنْ كَرِهَ مِنْهَا خُلُقًا رَضِيَّ مِنْهَا آخَرَ)

(Kama caroodo mu'min muminad, hadduu ku naco dabci wuxuu raalli kaga noqonayaa mid kale), waxa ugu dambeeya uu ku dardaarmay dhimashadiisa kaddib waa haweenka, wuxuu leeyahay:

(اسْتَوْصُوا بِالنِّسَاءِ خَيْرًا)

(Kula dardaarma haweenka khayr).

Waxaa la rabaa inay noqoto dabacsanaanta dhaqan ka dhexeeya labada isqaba, iyo inay ahaato qaunuun noloshooda u hagaya, maxaa ka fiican wixii uu ku yiri Abuddardaa -Ilaahay raalli haka noqdee - xaaskiisa: "haddaad i aragto inaan xanaaqay i raalligali haddaan ku arko inaad xanaaqday waan ku raalligalinayaa", taasoo ah kala badal insaaniyadeed oo ku salaysan cadaalad iyo dabacsanaan.

* In loo dabacsanaado deriska wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

٦

{وَاعْبُدُوا اللَّهَ وَلَا تُشْرِكُوا بِهِ شَيْئًا وَبِالْوَالَّدَيْنِ إِحْسَانًا وَبِذِي الْقُرْبَى
وَالْيَتَامَى وَالْمَسَاكِينِ وَالْجَارِ ذِي الْقُرْبَى وَالْجَارِ الْجُنُبِ وَالصَّاحِبِ بِالْجَنْبِ}

(Caabuda Alle hana la wadaajinina waxba, labada waalidna wanaag u sameeya, iyo qaraabada, agoonta, masaakiinta, dariska dhaw, dariska durugsan, saaxiibka dhinaca)

Maxaa ka badan in uu nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - deriska kula dardaarmay wuxuu yiri:

(مَا زَالَ يُوصِينِي جِبْرِيلٌ بِالْجَارِ ، حَتَّىٰ ظَنَّتُ أَنَّهُ سَيُوْرَرُثُهُ)

(Kama suulin Jibriil inuu igala dardaarmo deriska ilaa aan u maleeyo inuu dhaxalsiin doono), wuxuu yiri:

(مَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَلَيُكْرِمْ جَارَهُ)

(Qofka rummaysan Ilaahay iyo maalinta aakhiro ha karaameeyo deriskiisa), wuxuu yiri:

(وَاللَّهُ لَا يُؤْمِنُ ، وَاللَّهُ لَا يُؤْمِنُ ، وَاللَّهُ لَا يُؤْمِنُ) ، قِيلَ : مَنْ يَا رَسُولَ اللَّهِ؟ قَالَ : (الَّذِي لَا يَأْمُنُ جَارُهُ بَوَائِقُهُ)

(Wallaahi ma rumaynayo, wallaahi ma rumaynayo, wallaahi ma rumaynayo), waxaa la yiri: waa kuma rasuulkii allow? wuxuu yiri: (Kan dersikiisa aan ka nabadgalaynin shartiisa)), wuxuu yiri:

(خَيْرُ الْأَصْحَابِ عِنْدَ اللَّهِ خَيْرُهُمْ لِصَاحِبِهِ ، وَخَيْرُ الْجِيرَانِ عِنْدَ اللَّهِ خَيْرُهُمْ لِجَارِهِ)

(Saaxiib waxaa ugu fiican Alle agtiisa kan ugu khayr badan saaxiibkiisa, dersina waxaa ugu fiican Alle agtiisa

kan ugu khayr badan deriskiisa), wuxuu leeyahay rasuulka Alle:

(لَيْسَ الْمُؤْمِنُ الَّذِي يَبِيتُ وَجَارُهُ إِلَى جَنْبِهِ جَانِعٌ)

(Muslinka ma aha kan barinaya asoo deriskiisa dhiniciisa ku gaajaysan)

* Sidoo kale waxaa habboon in samaaxada u dhexeayso dadka isla shaqeeya iyo dadka isla dhigta jaamacadaha iyo dugsiyada iwm. quraanka xiriirka dadka oo dhan ayuu adkeeyay, wuxuu leeyahay Alle:

{يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِنَّا خَلَقْنَاكُمْ مِنْ ذَرَّةٍ وَأَنْثَى وَجَعَلْنَاكُمْ شُعُوبًا وَقَبَائِلَ
لِتَعَارَفُوا إِنَّ أَكْرَمَكُمْ عِنْدَ اللَّهِ أَتْقَانُكُمْ إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ خَبِيرٌ}

(Dadow waxaan idinka abuurnay lab iyo dhaddig, waxaanna idinka yeelnay shucuub iyo qabiilooyin si aad isu aqoonsataan, ruuxase ugu sharaf badan Alle agtiisa waa ka idiinku dhawrsasho badan, Allana wax walba waa ogyahay).

Nabiga wuxuu ahaan kan ugu fiican dabeeecadda markuu dadka oo dhan la dhaqmayo iyo asxaabtiisa, wuxuu ahaa midka mucaamaladooda wanaajiyo, kooda jirran booqda, kuwooda saboolka ah ku sadaqaysta, deentoodana guda iyo danahooda, kooda qaldanna iska cafiya, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{فَإِنَّمَا رَحْمَةً مِنَ اللَّهِ لِئَلَّا تَكُونَ فَظَّا غَلِيلَ الْقُلُوبِ لَا نَفَضُوا مِنْ حَوْلِكَ فَاغْفُ عنْهُمْ وَاسْتَغْفِرْ لَهُمْ وَشَأْوِرْهُمْ فِي الْأَمْرِ}

(Naxariista Alle darteed ayaad ugu jilicday haddaadse tahay mid qallafsan oo qalbi adag way kaa kala tagi lahaayeen gaararkaada, ee iska cafi una dambi dhaaf warso kalana tasho amarka).

* Samaaxada waddada iyo gaadiidka: qofka wuxuu kala kulmi karaa dhib oo qof kale kula kacayo, maxaayeelay dadka waxaa ku jira qof adag waxaa ku sugaran mid qallafsan waxaa ku jira mid dabacsan, waxaa ku sugaran mid xoog leh iyo mid daciif ah iyo mid loo dulqaadan karo iyo mid aan loo dulqaadan karin, maxaa ka wanaagsan qofka waxaasoo dhan inuu ku waajaho dabacsanaan iyo dulqaad, oo ay noqoto jawaabtiisa mid wadata jilicsanaan iyo edeb, wuxuu yiri Alle:

{وَعِبَادُ الرَّحْمَنِ الَّذِينَ يَمْشُونَ عَلَى الْأَرْضِ هُوَنَا وَإِذَا خَاطَبَهُمُ الْجَاهِلُونَ
قالُوا سَلَامًا}

(Addoomada Allaha Raxmaanka waa kuwa u socda dhulka xasillooni, markay la hadlaan (af xumeyyaan) jaahilliintana waxay yiraahdaan nabadgalyo), wuxuu leeyahay nabigeena:

(لَا تَدْخُلُونَ الْجَنَّةَ حَتَّىٰ تُؤْمِنُوا ، وَلَا تُؤْمِنُوا حَتَّىٰ تَحَابُّوا ، أَوْلَأَذْكُمْ
عَلَى شَيْءٍ إِذَا قَعْدَتُمُوهُ تَحَابِبُتُمْ؟ أَفْشُوا السَّلَامَ بَيْنَكُمْ)

(Jannada galimaysaan ilaa aad ka rumaysaan, mana rumaynaysaan ilaa aad is jeclaataan, ma idin tusaa wax haddaad samaysaan oo aad is jeclaanaysaan? Salaanta ku faafiya dhexdiina).

Sidoo kale waxaa habboon in la raaco sharciga waddada u degsan iyo gaadiidka in loo banneeyo kursiyada dadka waaweyn iyo dadka tabarta yar iyo dumarka iyo in la ilaaliyo dadka dareenkooda iyo in loo dhimriyo, wuxuu leeyahay nabigeena:

(إِنَّ الرِّفْقَ لَا يَكُونُ فِي شَيْءٍ إِلَّا زَانَهُ ، وَلَا يُنْزَعُ مِنْ شَيْءٍ إِلَّا شَانَهُ)

(Xasilloonida wax kuma sugnaato inay qurxiso mooyee, waxna laga siibo inuu xumaado mooyee).

* Muuqaallada dabacsanaanta waxaa ka mid ah nafta inay ku dabacsanaato hantida, waxbixinta waxay daliil u tahay iimaanka Ilaahay iyo rasuulkiisa, iyo daliilka wanaagga qofka iyo toosnaantiisa mu'miniinta ayaa sidaas lagu garanaya quluubtana arrinkaas ayay ku kulantaa, addookana samafal ayuu ku gaaraa, wuxuu yiri Alle:

{لَنْ تَنَالُوا الْبِرَّ حَتَّىٰ تُنْفِقُوا مِمَّا تُحِبُّونَ}

(Ma gaaraysaan samafalka ilaa aad wax kaga bixisaan waxa aad jeceshiin), in wax la siiyo fuqarada iyo masaakiinta waxay tilmaamaysaa samaaxada nafta iyo karamkeeda, wuxuu yiri rasuulka:

(السَّخِيُّ قَرِيبٌ مِنَ اللَّهِ ، قَرِيبٌ مِنَ الْجَنَّةِ ، قَرِيبٌ مِنَ النَّاسِ ، بَعِيدٌ مِنَ النَّارِ)

(Deeqsiga wuxuu u dhow yahay Alle, wuxuu u dhow yahay jannada, wuxuu u dhow yahay dadka, wuxuu ka fog yahay naarta).

* Sidaas oo kale dabacsanaanta xagga iibka iyo iibsashada ama gudashada, wuxuu leeyahay nabigeena:

(رَحِمَ اللَّهُ رَجُلًا سَمْحًا إِذَا بَاغَ ، وَإِذَا اشْتَرَى ، وَإِذَا أُفْتَضَى)

(Ilaahay ha u naxariisto nin saamaxaya markuu wax iibinayo iyo markuu wax iibsanayo iyo markuu wax gudanayo), waxaa laga wariyay Cirbaad bin Saariya - Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu yiri:

بَعْثُ مَنْ النَّبِيِّ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) بَكْرًا، فَاتَّيْتَهُ أَنْقَاضَاهُ ، فَقُلْتُ : يَا رَسُولَ اللَّهِ ، افْظِنِي ثَمَنَ بَكْرِي ، فَقَالَ : أَجَنْ ، لَا أَفْظِنِكَهَا إِلَّا لِجَنَيْتَهَا – أَيِّ : أَعْطَيْكَ الشَّمْنَ دِرَاهِمْ جَدِيدَةَ نَاصِعَةَ الْبَيْاضِ – قَالَ : فَقَضَانِي فَأَخْسَنَ قَضَائِي

(Waxaan ka iibiyay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - qurbac waxaan u imid anoo ka qaadan rabo lacagta, waxaan ku iri: rasuulkii allow i sii lacagta qurbacayga, wuxuu yiri: waa yahay : kuma siinayo lacag cusub mooyee, wuxuu yiri si fiican ayuu iigu guday deynta,), waxaa u yimid nin reer baadiye ah, wuxuu yiri: rasuulkii allow: ii gud qurbacayga, wuxuu siiyay rasuulka Alle rati weyn, wuxuu yiri: rasuulkii allow kan ayaa ka fiican qurbacayga, wuxuu yiri rasuulka:

(إِنَّ خَيْرَ الْقَوْمِ خَيْرُهُمْ قَضَاءً)

(Dadka waxaa ugu khayr badan kuwooda ugu gudid fiican), wuxuu ku boorriyay nabiga wax kaste oo keenaya samaaxo iyo fudeyd, oo dadka walaal ka dhigaya oona is jeclaysiinaya, in laga cafiyo oo kale

qofka dhibaataysan ama loo in kaadiyo, wuxuu yiri rasuulka:

(مَنْ أَنْظَرَ مُغْسِرًا ، أَوْ وَضَعَ عَنْهُ ، أَظْلَلَ اللَّهُ فِي ظِلِّهِ)

(Qofkii u kaadiyo kan dhibaataysan ama ka dejijo (deynta) Ilaahay harkiisa ayuu ugu hareynayaa), wuxuu yiri:

(كَانَ رَجُلٌ يُدَافِئُ النَّاسَ ، فَكَانَ يَقُولُ لِفَتَاهُ: إِذَا أَتَيْتَ مُغْسِرًا فَتَجَاوِزْ عَنْهُ، لَعَلَّ اللَّهَ يَتَجَاوِزْ عَنَّا ، فَلَقِيَ اللَّهَ فَتَجَاوِزَ عَنْهُ)

(Nin ayaa dadka deyn siin jiray wuxuu ku dhihi jiray gacanyarehiisa: haddaad u tagto qof culeys haysto iska dhaaf, waxaa dhici karta Ilaahay inuu naga dhaafo, Ilaahay ayuu la kulmay wuuna ka dhaafay).

Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qiraya in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qiraya in sayidkeena iyo nabigeena Muxamed uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Walaalaha islaamka ahow:

Waxa ugu weyn muuqaallada samaaxadda uguna fudud waa in la helo kalmadda wanaagsan, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

﴿وَقُولُوا لِلنَّاسِ حُسْنًا﴾

(**dadka wanaag dhaha**), wuxuu leeyahay:

﴿وَقُلْ لِعِبَادِي يَقُولُوا أَلَّا تِهِ أَحْسَنُ﴾

(**Ku dheh addoomahayga ha dhahaan tan ugu wanaag badan**).

Kalmadda wanaagsan dadka oo dhan aaya lagula hadlaa si kaste ay u kala duwan yihin xagga midabkooda iyo jinsigooda iyo caqiiqadooda, taas waxay tusinaysaa tarbiyada wanaagsan iyo akhlaaqda suuban waxaa horay loo yiri: "dabeeecadda wanaagsan waa wax sahlan weji furan iyo hadal jilicsan".

Alle wuxuu amray sayidnaa Muusa - nabadgelyo korkiisa ha haatee - inuu Fircoon ku dhaho hadal fiican isagoo islaweynaa oona madax adkaa, wuxuu yiri Alle:

﴿إِذْهَبَا إِلَى فِرْعَوْنَ إِنَّهُ طَغَى * فَقُولَا لَهُ قَوْلًا لَعَلَّهُ يَتَذَكَّرُ أَوْ يَخْشَى﴾

(**Aada xagga Fircoon wuu xadgudbaye * Una dhaha hadal jilicsan bal inuu waxa xusuusto ama cabsado**).

Sidoo kale waxaa habboon in laga fogaado wax kastoo macno lahayn, wuxuu leeyahay Alle:

{وَالَّذِينَ هُمْ عَنِ اللَّغْوِ مُعْرِضُونَ}

(Oo ah kuwa hadalka macnadarro ka jeedsada), wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ وَقُولُوا قَوْلًا سَدِيدًا}

(Kuwa (xaqa) rumeyyoow ka dhawrsada Alle hadal toosanna ku hadla), wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{أَلَمْ تَرَ كَيْفَ ضَرَبَ اللَّهُ مَثَلًا لِكَلِمَةٍ طَيِّبَةً كَشَجَرَةً طَيِّبَةً أَصْلُهَا ثَابِتٌ وَفَرْعُهَا فِي السَّمَاءِ * تُؤْتَى أُكُلَّهَا كُلَّ حِينٍ يَإِذْنِ رَبِّهَا وَيَضْرُبُ اللَّهُ الْأَمْثَالَ لِلنَّاسِ لَعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ}.

(Ma ogtahay sida Alle ugu yeelay tusaale ereyga fiican sida geed wanaagsan oo laamahiisana cirka ku shareera * oo siiya cunnadiisa waqt kasta idinka rabbigiis dartii, wuuna u yeelaa Alle tusaalooyinka dadka si ay waanda u qaataan), wuxuu yiri rasuulka:
 (إِنَّ الْعَبْدَ لَيَكَلِمُ بِالْكَلِمَةِ مِنْ رِضْوَانِ اللَّهِ ، لَا يُلْقِي لَهَا بَالًا ، يَرْفَعُهُ اللَّهُ بِهَا دَرَجَاتٍ ، وَإِنَّ الْعَبْدَ لَيَكَلِمُ بِالْكَلِمَةِ مِنْ سَخْطِ اللَّهِ ، لَا يُلْقِي لَهَا بَالًا ، يَهُوِي بِهَا فِي جَهَنَّمَ)

(Addoonka wuxuu ku hadlayaa erey oo ka mid ah raalliga Alle asoon ka war haynin Ilaahayna darajooyinka uyuu ugu kordhinayaa, addoonka wuxuu ku hadlayaa erey ka mid ah carada Ilaahay asoon ka war haynin, naarta Jahannamo ayuu ugu dhacayaa).

Sidoo kale waxaa waajib ah in laga fogaado dhammaan axumada hadalka, wuxuu leeyahay rasuulka:

(إِنَّ الْمُؤْمِنَ لَيْسَ بِاللَّغَانِ ، وَلَا الطَّعَانِ ، وَلَا الْفَاحِشِ ، وَلَا الْبَنْدِيءُ).

(Mu'minka ma aha mid lacnad badan ama durid badan ama axfunkama af xaar ah), samaaxada waxay u dhixeyso labo waxyabood iska soo horjeeda ad'adayg iyo fudfudeyd, labadaba waa xagjirnimo ka fog manhajka Islaamka oo dhixdhixaadka ah kasoo leh wax badan samaaxo iyo fududeyn iyo dhimrin oo ka takhalusaya dhammaan qaababka xagjirnimada iyo xadgudubka iyo ka badbadinta iyo ka gaabinta.

**Ilaahayo nagu arsaaq samaaxada xagga hadalkeena
iyo falkeena iyo dhaqankeena iyo dhammaan
arrimaheena.**

**dhexdeenhaha hagaaji dalkeenana noo ilaali iyo
dhammaan dalalka caalamka.**